



CROIX-ROUGE  
FRANÇAISE



RETABLISSEMENT  
DES LIENS FAMILIAUX



Cofinancé par  
l'Union européenne






## Habraaca Mideynta qosyka

Waxaan ahay qof qaxooti ah oo ku sugan Faransiiska. Waxaan rabaa in aan soo kaxeeyo qaraabadayda.

Qof qoyskeyga ka midah ayaa qaxooti ku ah Faransiiska. Waxaan rabaa inaan ku biiro.



Wuxuu khuseeyaa qofka magangalyo-doonka ah ee ku sugan Faransiiska iyo qoyska dibadda ku sugan, mid kastana waxa uu door ka ciyaraa habraaca.

# Mideynta Qoyska, Waa maxey?

Tani waa fursadda xubnaha qoyskaaga ay ku dalban karaan fiisaha joogitaanka dheer si ay kuugu soo biiraan Faransiiska.

Haddii aad tahay qof qaangaar ah, waxaad soo kaxaysan kartaa xaaskaaga ama ninkaaga iyo carruurtaada aan qaan-gaarin ee aan weli guursan (ka yar 19 sano jir).

Haddii aad tahay qof aan qaan-gaarin, waxaad soo kaxaysan kartaa waalidkaa iyo carruurtooda kale ee aan qaan-gaarin ee iyaga ku tiirsan.



## Digniin

Marka laga reebo xaaladaha gaarka ah, haddii aan ahay qof aan qaan-gaarin oo ay waalidiintaydu dhinteen ama lumiyeen, ma soo kaxaysan karo walaalahayga yaryar

### → Ma samayn karaa habraacan?

Si Haddii aad heshay xaaladda qaxootinimo, ilaalinta ku-meel-gaarka ah, ama xaaladda muwaadin la'aanta ah, waxaad bilaabi kartaa habraaca mideynta qoyska.

### → Goormaan bilaabi karaa habraaca mideynta qoyska?

Waxaad bilaabi kartaa habraaca mideynta qoyska marka aad hesho xaaladdaada OFPRA (Xafiiska Faransiiska ee Ilaalinta Qaxootiga iyo Muwaadin la'aanta) ama CNDA (Maxkamadda Qaranka ee Xuquuqda Magangalyada).

→ Haddii aan helay magangalyo OFPRA ama CNDA anigoo aan qaan-gaarin, oo aan markii dambe qaan-gaar noqday, ma bilaabi karaa habraaca mideynta qoyska?

Haa, waxa ugu muhiimsan waa inaad codsigaaga magangalyada soo gudbisay marka aad ahayd qof aan qaan-gaarin.

→ Maxay tahay farqiga dhheeeyaa mideynta qoyska iyo isu keenista qoyska?

Isku keenista qoyska waxay khuseysaa dadka si sharci ah ugu nool Faransiiska sababo aan ahayn magangalyada muddo ka badan 18 bilood, oo leh ilo dhaqaale oo ku filan si ay qoysaskooda u soo dhaweeyaan (sida mushaar, guri, iwm.).



### *Digniin*

Haddii aad guursatay ka dib marka aad heshay ilaalintaada OFPRA/CNDA, ma dalban kartid mideynta qoyska. Xaaladdaas, waxaad bilaabi kartaa habraaca isu keenista qoyska.

# Soo koobid iyo tillaabooyinka waaweyn

1.


## WAXAAN DIYAARINAYAA FAYLKEYGA CODSIGA FIISAHА

bogga 7

Tallaabada 1

Waxaan diyaarinayaa faylkayga


bogga 8



Tallaabada 2

Waa inaan buuxiyaa foomka  
bogga France-Visas


bogga 10



Tallaabada 3

Waxaan ballan ka qabsadaa  
safaaradda Faransiiska  
qoyskeyga


bogga 12



2.

## SAFAARADDU WAXAY KA SHAQAYNAYSAA CODSIGAYGA FIISAH.

bogga 15



Tallaabada 4



Tallaabada 5

Waxaan buuxiyaa foomka BFR  
(Xafiiska Qoysaska Qaxootiga)

bogga 16

Waxaan sugayaan in  
safaaraddui siiso jawaab

bogga 17

3.

## SAFAARADDU WAXAY SOO SAARTAA GO'AAN

bogga 19



Safaaraddu  
way oggolaatay  
bogga 20



Safaaraddu jawaab  
ma bixin  
bogga 21



Safaaraddu waxay  
bixisay jawaab diidmo ah  
bogga 22

# DEMANDE DE VISA

PHOTO

NOM:

NOM DE  
NAISSANCE:

PRÉNOM(S):

SEXЕ:

M ♂  
 F ♀

LIEU DE NA

N° DE DOCUMENT

RÉSIDENCE

PROFES

Partie réservée  
à l'administration

6



1.

# **Waxaan diyaarinayaa faylkayga codsiga fiisaha**

---



**Qoyskaygu waa inay codsi fiisaha  
joogitaanka dheer u gudbiyaan safaaradda  
Faransiiska ee waddanka ay ku sugan yihiiin**

**Xaggee baan ka bilaabaa?**

## Tallaabada 1

# Waxaan diyaarinayaa Faylkayga codsigeyga fiisaha



## Waxaan ku suganahay Faransiiska

### Waxaan u baahanahay inaan soo ururiyo dukumiintiyada soosocda:

- Foomka France-Visas (fiiri bogga 10)
- Wicitaanka xarunta fiisaha ama Isafaaradda.
- Sawirro aqoonsi ah oo qoyskeyga ah
- Nuqlu labada dhinac ah oo sharciga degganaanshaha ama risidiga ah (marka laga reebo carruurta aan la socon haddii aysan diyaar ahayn).
- Go'aanka OFPRA ama CNDA.
- Shahaadada dhalashada OFPRA \*
- Buugga qoyska ee OFPRA \*
- Warqadda guurka ee OFPRA \*
- Baasaboorada xubnaha qoyskeyga oo ansax ah in ka badan lix bilood.
- Warqadaha dhalashada ee xubnaha qoyskeyga.
- Warqadda guurka.
- Haddii ay kala tageen: xukun furiin iyo/ama xukun ku saabsan wareejinta awoodda waalidnimada si carruurta loo keeno.

\* haddii horey loo helay.

Haddii uu geeriyooyday seygeyga: warqadda dhimashada.

Maaha waajib in la helo  
dhammaan  
dumentiyadan,  
laakiin waxaan isku  
dayayaa inaan ururiyo  
inta ugu badan.

- Dumentiyo kasta oo caddeyn kara xiriirka qoyskeyga (sawirro qoys, wada sheekeysi farriimo ah, wicitaanno muuqaal ah, xawaalado lacag, buugaag tallaal, shahaadooyin dugsi...)
- Faahfaahinta xiriirka qaraabadyda ee ku sugar dalka ay joogaan.

### Carruurta aan lala socon (MNA) :

- Nuqlu qimeyn ta yarida (haddii laguxuso xubnaha kala duwan ee qoyska MNA).
- Nuqlu OPP, xukunka caawinta waxbarasho ama go'aankawakilka.
- Shahaadada qaabiladda Daryeelka Bulshada Carruurta (ASE).
- Warqad ka timid qof wakiil ka ah ASE oo xaqiijinaya in mideynta qoyska ay danta ugu jirto MNA.

Dukumiintiyada ku qoran  
luqad qalaad waa in lagu  
lifaqaa tarjumaadooda  
sharchiyeysan.


Waa inaan caddeeyaa aqoonsiga qaraabadayda iyo joogtaynta xiriirkaa qoyskaee qoyskeyga dibadda. Waa inaan sharaxaa sababta qaarkood dukumiintiyada u maqan yihiin. Xaaladda ku xiran, faylkayga waxa uu yeelan karaa dukumiintiyokale oo aan halkan lagu taxanayn



### Waxaan ku suganahay dibadda



Waxaan soo ururiyaa inta ugu badan ee dukumiintiyoah oo waxaan **nuqullo ama sawirro** u diraa qof qaraabadayda ah ee ku sugan Faransiiska (baasaboorkayga, shahaadada dhalashada, sawirro la helay, iwm.).



### Waxaan u baahanahay inaan qorsheeyo safarkayga

(gaadiidka, hoyga, fiisaha gelitaanka haddii uu yahay waddan kale, kharashka, iwm.) ka hor ballanta safaaradda Faransiiska.



### DIGNIIN

Maamulka Faransiiska Maamulka Faransiiska wuxuu hubin doonaa is waafajinta bayaannada aan ka bixiy OFPRA (magacyada, magaca hore, taariikhda iyo goobta dhalashada xubnaha qoyskeyga, tirada carruurta, iwm.). Waxaan warqad ku ogeysiyyaa OFPRA haddii ay jirto wax ka beddel loo baahan yahay in lagu sameeyo diwaanka madaniga ah.




### DIGNIIN

Haddii aan u baahanahayinaan dalbado fiiso waddan kale oo aan ahayn waddankeyga asalka ah, waa inaanraadiyyaa macluumaad si aan u ogaado sida sharcyan loogu soo galo lagana baxo waddankaas.



Tallaabada 2

Waa inaan buuxiyaa foomka  
bogga France-Visas.





## Waxaan ku suganahay Faransiiska



### Waxaan aadayaa bogga France-Visas.



Kadib marka aan sameeyo akoon, waaan buuxiyaa foomka codsiga fiisahaee xubin kasta oo ka mid ah qoyskeyga.

→ **Maxaan sameevaa haddii govskevguuusan lahvñ baasaboorka?**



Waxaan codsan karaa **marinka socdaalka**. Si tan loo sameeyo, waaan gelinaya n abuurka ah (XXX000) si loo ansixiyo foomka France-Visas.

### DIGNIIN

Waddamo qaarkood, waxaaqasab ah in la haysto baasaboorka sababtoo ah marinka socdaalka lama aqoonsana.



## Waxaan ku suganahay dibadda



Waxaan qoyskeyga ku suganFaransiiska siiyay faahfaahinta xiriirkayga iyo sidoo kale cinwaankayga (nambarka taleefanka, cinwaanka iimaylka, cinwaanka boostada).



Waxaan si taxaddar leh u ilaaliyaa isla lambarka taleefanka iyo iimayllada firfircoon inta lagu jiro codsiga fiisaha oo dhan.



### Tallaabada 3

## Waxaan u qabtaa qoyskeyga ballan safaaradda Faransiiska.



### Waxaan ku suganahay Faransiiska


→ Xaggee avaan uga qabtaa ballan qaraabadya ?



Waxaan galayaa bogga France-Visas



si aan u fiiriyo meesha iyo sida loo qabto ballanta iyo cidda qaabilsan ballanta.



Waxaan ballan ka qabsadaa bogga internetka ee safaaradda.

ma xarunta fiisaha ee lagu xusay bogga France-Visas (VFS, AEG, CAPAGO, TLS, Sogebank...).

Waddamo qaarkood, qoyskeyga ayaa u baahan in ay goobta tagaan si ay ballan u qabsadaan.



Safaaradda ama xarunta fiisaha ayaa xaqijisa ballanta.



Codsiga fiisaha waa lacag. Waxaan si taxaddar leh u akhriyaa bogga France-Visas si aan uga fogaado khiyaamada.



Haddii aan u baahdo inaan ballan khadka tooska ah uga qabsado xarunta fiisaha (VFS, AEG, CAPAGO, TLS...), waxaa laga yaabaa inaan u baahdo kaar bangi ama lambarka taleefanka maxalliga ah oo aan Faransiis ahayn.



Waqtiga sugaalahaa ee lagu helo ballan wuxuu mararka qaar noqon karaa mid aad u dheer.



**Ka hor ballanta safaaradda,** Waxaan u diraa faylka codsiga fiisaha qoyskeyga dibadda si ay u daabacaan.



Ka dib marka la gudbiyo codsiga fiisaha ee qaraabadayda, waxaan soo qaataa **nuqul ka mid ah rasiidka** ay bixisay safaaradda ama xarunta fiisaha (VFS, AEG, CAPAGO, TLS...).

**Carruurtayda aan qaangaarin waa inay la socdaan qof weyn oo aan qoraal ku wakiishay si ay u tagaan ballanka safaaradda.**

Dukumentigan wuxuu muujinayaa taariikhda bilaabiddabaaritaanka iyo lambarka faylka codsiga fiisaha.



### Waxaan ku suganahay dibadda



**Waxaan daabacanayaa dhammaan faylkeyga,** waxaan keenaadukumiintiyadeyda asalkaah (haddii aan haysto) maalinta ballanta.



Haddii aan ku suganahay waddan shisheeye, **waxaan hubiyaa in aan dib u helo baasaboorkayga** dhamaadka ballanta.



Ma ilaawin inaan lacag ila soo qaato si aan u bixiyo kharashyada **faylkayga** (99 euros oo lacagta waddanka ah visa kasta) iyo kharashyada adeegyada haddiiy jiraan.



**Waxaan haystaa rasiidka safaaradda ama xarunta fiisaha,** Kaas ah u gudbiyay faylkayga.



### Ma seegav ballantaydii?

**Waxaan la xiriirayaan safaaradda ama xarunta fiisaha** (VFS, AEG, CAPAGO, TLS...) si aan uga warbixiyo xaaladda oo aan u weydiisto ballan cusub.



**2.**

## Safaaraddu waxay ka shaqaynaysaa codsigayga fiisaha.

Waqtiyada shaqaynta way dheeraan karaar  
Celcelis ahaan waa inaan sugaa inta u dhaxaysa 2 ilaa 8 bilood.

## Tallaabada 4

### Waxaan buuxinayaa foomka BFR


(Xafiiska Qoysaska Qaxootiga)



Waxaan ku suganahay  
Faransiiska



Waxaan ku suganahay  
dibadda




Xafiiska Qoysaska Qaxootiga (BFR) wuxuu ii soo diraa foom macluumaad. Waxaan buuxiyaa foomka, waxaana ka caawimaad weydiistaa qof amaurur haddii loo baahdo.



Waa inaan sugaa.  
Looma baahna in aan tago safaradda.



Waxaan si degdeg ah ugu soo celiyaa dhammaan dokumentiyada la cadsaday. Haddii aanan hayn qaar ka mid ah dokumentiyada la cadsaday (tusaale: dokumentiga safarka ee qaxootiga), waxaan ku wargelinayaa BFR isla warqaddaas.



### Tallaabada 5

## Waxaan sugayaa in safaaradu i siiso jawaab.



Waxaan ku suganahay  
Faransiiska



Waxaan ku suganahay  
dibadda

#### Xaaladda 1-aad :

Iyadoo aan la helin ogeysiis dib-u-dhac ku saabsan socodsiinta. Laba bilood ka dib ballanta iyo iyadoo aan la helin ogeysiis dib-u-dhac ku saabsan socodsiinta, waa inaan dalab geeyaa Guddiga Racfaanka ee ka soo horjeeda diidmada fiisaha (CRRV). Waxaan haystaa hal bil si aan u gudbiyo racfaankan. Xaaladdan, waxaan ka caawimaad qaadanayaa urur ama qareen.



Waa inaan sugaa.  
Looma baahna in aan tago safaaradda.

#### Xaaladda 2-aad :

Ogeysiis kordhin ah oo ku saabsan habraaca hubinta dokumentiyada shisheeye - muddada waa 4 bilood (dib loo cusboonaysiin karo hal mar).

Waxaan weydiisan karaa warbixin ku saabsan habraaca codsigeyga anigoo buuxinaya foomka xiriirkha ee BFR, ama anigoo toos u qoraya safaarada. Safaaradu waxay kordhin kartaa habraaca guud ilaa 8 bilood ka dib ballanta.





# **3.**

## **Safaaraduwaxay soosaartaa go'aan**



Xaalado kala duwan ayaa igu soo food saari kara:  
safaaradu waxay siin kartaa fiisaha qoyskeyga  
amaway diidi kartaa. Waa maxay tallaabooyinka  
la qaadayo iyadoo ku xiran go'aanka la qaatay?

## Safaaraddu si wanaagsanayay uga jawaabtay



### Waxaan ku suganahay Faransiiska

Aniga iyo qoyskayga, waxaan hubinnaa shuruudaha ka bixitaanka dalka ay degan yihiin.

Waxaan ka caawinayaan qoyskeyga inay diyaariyaan bixitaanka (tigidho diyaaradeed iwm).

Haddii ilmahayga aan qaan- gaarin uu kalogiis safro, waxaan qori doonaa ogolaansho safar oo waxaan weydiin doonaa shirkadda duulimaadka haddii ilmuu lala socon karo inta lagu jiro safarka.



### Waxaan ku suganahay dibadda

Waxaan aadayaa safarada, waxaanan soo qaadanayaan baasaboorkayga (ama warqad fasax ah ee safarka) iyo fiisahayga.

**Waxaan haystaa 3 bilood si aan ugu ambabaxo Faransiiska.**



#### DIGNIIN

Anigoo wata warqad fasax ah ee safarka Waxaan haystaa hal bil oo kaliya si aan ugu ambabaxo Faransiiska.

Haddii ay tahay in la helo fiisobixitaan ama in la bixiyo khidmada sharciyeenta joogitaanka, waxaan sameeyaa tallaaboo yinka lagama maarmaanka ah.

## Safaaraddu kama jawaabin



**Waxaan ku suganahay  
Faransiiska**



**Waxaan ku suganahay  
dibadda**

Haddii aanan weli helin  
jawaab kadib 8 bilood, waxay  
ka dhigan tahay in safaaraddu  
si qarsoodi ahu diidday  
codsigayga.

**Waxaan la xiriirayaa  
safaaraddadib u dhac ah  
oo aan weydiyo sababaha  
suurtagalka ah ee  
diidmada, maxaa yeelay  
xaalado qaar waxaan sugi  
karaa in ka badan 8 bilood**

**Waxaan la xiriiri karaa safaaradda  
si aan u helo wararka ugu  
dambeeyay ee kusaabsan  
codsigayga fiisaha.**



## Safaaraddu waxay si taban uga jawaabtay



### Waxaan ku suganahay Faransiiska

**Waxaan haystaa hal bil si aan  
racfaan uga qaato CRRV.**

Xaaladdan, waxaan caawimo ka  
raadsadaa urur ama qareen.

Haddii CRRV diido, waa inaan racfaan u qaataa  
Maxkamadda Maamulka ee Nantes anigoo  
kaashanaya qareen.

Marka loo eego ilahayga dhaqaale, waxaan codsan  
karaa kaalmada sharciga ah si aan u bixiyo  
kharashyada qareenka.









**Habka dib-u-mideynta qoyska wuu dheeraan karaa. Ha ka waaban in aad ka raadsato taageero urur, qofkaaga adeegyada bulshada, ama qof kale. Haddiiaad wax su'aalo ah qabto:**

**[reunifications@croix-rouge.fr](mailto:reunifications@croix-rouge.fr)**

**SERVICES ADMINISTRATIFS**

CAMPUS CROIX-ROUGE FRANÇAISE  
21, rue de la Vanne CS 90070  
92126 Montrouge Cedex  
Tél. : 00 33 (0) 1 44 43 11 00 - [www.croix-rouge.fr](http://www.croix-rouge.fr)

**SIÈGE SOCIAL**

98, rue Didot 75694 Paris Cedex 14



**CROIX-ROUGE  
FRANÇAISE**